Toddobaadka 20

Fasalka 3

# Xaalufinta dhirta

Leveled



Af Somali

Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2009 T.I.

The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: https://creativecommons.org/licenses/

# Xaalufinta dhirta

Fasalka 3 | Toddobaadka 20



# Baraha qaaliga ahow

Waxaa buugan luugu talagalay in uu kobciyo awooda akhriska ee radayda fasalka 3aad .

Waxaaana lagu saleeyay manhajka cusub ee af-soomaaliga. Doorka baruhu aad ayuu mihiim ugu yahay in ardaydu ka faa'iidaystaan buugan.

Sababtoo ah waxaa laga rabaa baraha in uu ku booriyo ama ku dhiirigaliyo carruurta in ay akhristaan buugtan. Hadaba baruhu waa in uu raacaa talaabooyinkan soosocda, marka ay tahay ardaydu in ay ku akhristaan fasalka gudihiisa.

1. Ka hor intayna ardaydu akhrinta sheekada bilaabin,waa in uu baruhu weydiiyaa su'aalaha ka horeeya sheekada.

2. Waa in uu baruhu ardayda siiyaa waqti fiican ooy ku akhrin karaan sheekada.

3. Baruhu waa in uu usheegu ardayda in ay ku celceliyaan akhriska sheekada.

4. Ardaydu markay dhammeyaan akhiska sheekada ,baruhu waa in uu waydiiyaa su'aalaha ku qoran dhammaadka sheekada.

## Laylis

Su'aalaha akhriska ka hor

1. Waa maxay xalufinta dhirtu?



# Sababaha keena xaalufka

Xaalufka dhulku waa mar kuu dhulku abaar noqdo ama daaqiyo biyo la'aan kajirto inta badana wuxuu dhacaa jiilaalkii. Xaalufku mar-marka qaarna gugii ayuu dhacaa waxaana la yidhaa abaari gu'bay dhacdaa waxaana loola jeedaa inta badan waxay ka bilaabantaa gu'ga. Maxaa yeelay gu'ga haddii roob la waayo waxaa jilaalkii dhacaa

waa abaar daba dheer. Abaartu waxyaalaha sababa waxaa loo qaybiyaa laba qaybood oo waa wayn. Ta koowaad waxaa keena sababo rabaani ah oo aan lagaran Karin waxaana ka timaadaa xaga eebe oo qudha waxa loo sababeeyaana majiraan waxaana la yidhaa abaar dibiici ah.


Waxaa kaloo jirta abaar ay sababaan banii'aadanku waana abaaraha ugu badan ee soo noqnoqda. Qaababka ay u sababaana way badanyihii inta badan abaaraha aduunka ka dhaca waxaa sabab u ah banii'aadanka. Abaaruhu waa markay biyo iyo baadba la waayo dad iyo duunyaduna waxay cunaan ay waayaan waana xilli aad u adag waxaana loo hayaamaa meelo dhaadheer ama fog-fog. waxaa laga yaaba hadii ay abaartu sii daba

dheeraato in ay ku dhintaan dadka iyo duunyaduba.

Abaaraha waxaa loo bixiyaa magacyo kala duwan sida dabadheer oo looga jeedo wakhti badan bay socotay. seema oo looga jeedo waxba mayna reebin dad iyo maaltoona. Macnuhuna waxaa weeye way seemtay ama way madhisay dad iyo duunyaba. Abaar walbana waxaa loogu magac daraa saamaynta iyo qaabka ay wax uyeesho bulshade iyo deegaankaba. Abaarta oo meelaha qaarna looga yaqaano diraac ayaa ah xilli aanay dadku badanaa jeclayn. Waxaana lagu yidhaahdaa wixii la rabo in la habaaro col iyo abaari ku qaaday oo looga jeedo abaari ku dishay. Waxaa kale uu abwaan soomaaliyeed horay u yidhi isaga oo is bar-bar dhigaya gu'ga iyo jiilaalka:-

jilaal abaar loo firdhay ooy fidhadu duulayso oo xoolihii foofijiray qaar fadhiyo reerka iyo foore roob oo onkaday sawma kala fiicna? guumays timaha feedhi oo fiidba rari dhaanka iyo tii filkeed guursataa sawma kala fiicna?

Dadka soomaalida oo ah dad badanaa xoolo dhaqata ah ayaa waxaa aad u saameeya xilliga jiilaa ka. Jiilaalka oo ah xilliga badanaa abaaruhu dhacaan ayaa ah xilli iska leh tilmaamo iyo calaamado gaar ah.



# Dhibaatada Xaalufinta dhirta

Haddaan tusaale usoo qaadano calaamada ama wax yaabaha dhaca jiilaalka ee badanaa lagu yaqaano way badan yihiin.

Jiilaalku wuxuu leeyahay tilmaamo gaar ah, tilmaamahaa waxaa ka mid ah roob la'aan, dhirta ooy celeentu ka daadato, dhulkoo qalala,xoolaha oo caana yareeya iyo wixii la mid ah. Abaarta iyo jiilaa ka oo aad isugu dhaw dadka qaarna moodaan in ayis ku mid yihiin. Laakiin waxaa jira farqi yar oo u dhexeeya jiilaalka badanaa waxaa la haystaa baad iyo biyo abaartuna waa baad iyo biyo la'aan.

Marka aan ka hadlayno dhibaatada uu dadku wadankeena ugaystay waxyaabaha ugu daran waa xaalufinta dhirta iyo nabaad guurka deegaanka. Dhibaatada uu keenay xaalufku oo aan u aaba yeelin cidnaba waxay sidoo kale ku dhacday beeraha iyo duunyaba. Abaarahan oo soo noqnoqda ayaan ilaa hada wax xal ah loohayn waxyaabahe keenana waxaa ubadan sababo ban'iiaadanku keeno. Dad yar oo ganacsato oo aan aqoon wanaagsan lahayn kana naxayn mustaqbalka jiilkan joogo iyo kan berriba ayaa uga ganacsatay dhirtii wadanka si sharciga ka baxsan.

Dhulka deegaanka Soomaalida Itoobiya oo aad ugu nugul nabaad guurka sababtuna tahay waa dhul carro jilicsan oo ku haboon beerashada beeraha wuxuuna leeyahay cimilo wanaagasan. Nasiib daro haddana

waxaan loo aabo yeelin jarista dhirta noocyada ugu muhiimsan ee wadanka ka baxda taas oo sababtay in carada kore ee nafaqada leh ay dabaysha iyo cagta raacdo waxayna saamayn ku leedahay noolaha kale kaa soo u saameeyaan nabaad guurku si sahlan. Dadka Soomaalida badan kooda waxaa lagu qiyaasaa inay yihiin xoolo dhaqato waxaadna dareemi kartaa muhiimadda ay u leedahay ilaalinta dhirta iyo deegaankaba. Arrintani aad bay muhiim ugutahay maadaama nolosha dadka Soomaaliyeed saddax meelood labo meel si toos ah ugu xidhantahay noloshooda, inta kalana si aan toos aheeyn iyagana ugu xiranyihiin. Taarikhdu markay ahayd 1928-dii ay ahayd markii ugu horaysay ee ay bilaabatay diyaarinta dhuxushe.

Dad Soomaali ah ayaa ka ganasada dhoofinta dhuxusha waxaana dhuxushii ugu horaysay laga dhoofiyay deegaankeena sanadki 1946dii waxaana loo ogolaan jiray ganacsatada in ay dhoofiyaan xaddi eray kele ku bedel oo fudud ah sanadkiiba. Dadkan ayaa Mudadii ay shaqadaa wadeen dhoofiyay dhuxul aad ubadan waxaana dhacay abaaro iyo nabaad guur aad ubadan. Muda dheer ka dib waxaa baraarugtay bulshadii somaaliyeed waxaana lagu soo rogay dadkii in aan dhuxusha la dhoofin karin dib danba cidii loogu arko la xukumo laguna xukumo mudooyin kala duwan.

Dadkii markay wax hogaaminaya waayeen ayay mar dambe kala biiq biiqeen waxayna soo rogeen mamnuucidda dhoofinta dhuxusha waxayna wacyigalin u sameeyeen

dadkii ku howlanaa dhoofinta dhuxusha. Arrintaas ka dib waxay Dowladda Itoobiya ahmiyad wayn siisay dhowrista deegaanka iyo duurjoogtaba waxeeyna xoojisay Hey'adihii ku shaqada lahaa daaqa qaranka. shirkadii dhoofinta dhuxusha ayaa marba marka ka danbaysa sii daciifayay waxaana lagu qiyaasaa in dadyar oo tiro badnayn ku soo hadheen gubida dhirta iyo shidida dhuxusha oo ugu danbayntii iskood u daayay.



# Faa'iidada dhirta

Sidaan wada ogsoonahay dhirtu waa hu'ga dhulka quruxda deegaanka waxayna inoo leedahay waxtar aad u badan. Waxtarka dhirta waxaa ka mid ah midhaheeda oon cuno, cadceedoon ka hadhsano, xoolaha oo inoo daaqa,quruxbay inooyihiin. Dhirta oo waxtarkeeda lasoo koobi Karin ayaa waxaa hadana jirta in dhibaato ba'an laguhayo. Hadaba dhirta oo inoo leh faa'iidadan

ayaa waxaa jira dadyar oo si khaldan u adeegsada isticmaalka dhirta. Celcelis ahaan xaabada dadka Itoobiya miyi iyo magaalaba ku shitaan waxaa lagu qiyaasaa Hubi oo iska hubso halbeegan cadee sanadkiiba.

Waxyaabaha sababa lama dagaanka dhulal aad ubadan oo ahaa keymaha adduunka ayaa dhirtii laga jaray lagana dhigay lamadagaan. Sannadihii lasoo dhaafay ayaa ugu badnaa waxaana cadadka ugu badan dhirtaa la xaalufiyay 50-kii sano ee lasoo dhaafay. Sanad kasta dhulka dhirta la xaalufiyo wuxuu la egyahay 13. 7 Milyan oo hektar. Waxyaabhaa loo isticmaalo keymaha iyo dhirta la xaalufiyay waxaa ka mid ah;
(1) Beeraha. Beeruhu waxay sababaan in keymaha la gubo lana xaalufiyo si loogu diyaariyo beerashada ama wax loogubeerto.

Sidoo kale marar badan waxaa loo jaraa dhirta adduunka siloo helo xaabo la shito. Waxaana adduunka kusoo badanaya koritaanka binii aadamka iyo kobaca magaalooyinka, waxaana si loo helo meela la dego la xaalufiyaa dhul aad u weyn laguna sameeyaa Carro guur. Carra guurkaas waxaa kaloo sababa Abaaraha, Kobaca adduunka ee dhul beereedka iyo Dhirta oo la jaro si kastaba ha ku timaadee. waxaana deegaanadaas qabsado oo ka dhaca Carro guuro aan deegaan iyo tabcashaba ku fiicnayn.



# Dhibaatada dhuxusha

Dadka dhuxusha diyaariyaa uma aabo yeelaan geedaha waxayna jaraan geed kasta oo ay isleeyihiin dhuxul ayuu noqon karaa. Waxaana ka mid ah dhirta ugu badan geedaha leysku yidhaahdo geed qodxeedka. Waxaana jiridda hoose laga jaraa geedo aad u farabadan si loo diyaariyo dhuxul. Xillayada qaar waxaa loo ogolaada ganacsatada dhuxusha in geedaha ay ka jaraan laamaha si markale looga faa'ideeysto geedka.

Hadase sharcigaasi majiro kaaga darane waxaa la keenay Mashiino loo isticmaalo jarista geedaha oo halkii maalin lagu jari karo 2-4 geed. Halka waagii hore qofka ka shaqeeyo dhuxusha ku qaadan jirtay diyaarinta iyo googooynta halgeed muddo 5-7 maalin ah badanaa. Geedaha ugu wanaagsan dhuxushana laga diyaariyo waxaa ka mid ah; Galoolka, maraaga. sogsogta iyo geedo kale oo badan. Dhirtan oo badanaa loo adeegsado siyaabo badan oo kale sida maydhaxda, oodida xoolaha, hadhsiga ayaan loo aabo yeelin.

Ilaalinta deegaanka waxa ay waxtar iyo manaafacaad u leedahay noolaha oo idil. Deegaanka hadaan la daryeelin wuxuu noqdaa lama dagaan taas oo keenta in nolosha ka suuroobi waydo. Maxaa yeelay sida uu banii aadamku uga hayaamo dhulka

lama dagaanka noqdo si la mid ah ayay duur joogtana uga hayaantaa. waxaana tiro badan oo duurjoogtii Soomaalida Itoobiya ahi galeen wadamada dariska ah.



## Gabagabadii iyo Gunaanadkii

Guud ahaan xaalufinta dhirtu waxay keentaa nabaad guur iyo dhulka oo noqda lama dagaan. Dhibaatooyinka ay keeneen ururada nabadiidka ahi waxaa ka mid ah in dhammaan nooluhu ka qaxaan meelaha colaadu ka jirto. Wixii kasoo hadhay ee keymaha ku dhuuntayna waa looga daba tagay oo laga xaalufiyay dhirtii iyo keymihii ay ku noolaayeen ha ahaadeen dugaag, shimbiro iyo xamaarataba. Hadaba waxaa habboon in aan dawlad iyo shacab kawada shaqayno ka hortaga xaalufinta deegaanka.

# Laylis

Ka jawaab su'aalahan



1. maxaa keena xaalufinta deegaanka?
2. Maxaa dhaca haddii la xaalufiyo deegaanka?
3. maxaa xal u ah ka hortaga xaalufka dhulka?



Bulsho Wada Nool



Hoshiisi Wehi

Dadaalkii Midho
Dhalay Ee Xaliimo

Dhaqanka Fiican



Shaqada Iyo Wax
Lahaanshaha

Waxtarka shaqada
